







## ICRC-DA SOOMAALIYA

Dalka Soomaaliya, ICRC-da oo si dhow ula shaqeynaysa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed waxay ka jawaabtaa baahida dhibanayaasha colaadaha oo inta badan ay ugu sii dareen masiibooyinka dabiiciga ah. Waxay siisaa gargaar deg deg ah iyo taageero loogu talagalay isku filnaashaha bulshada. Waxay horumarisaa ayna ilaalisaa xeerka caalamiga ee aadaminimada isla markaana booqotaa lahaystayaasha.

Hayadda ICRC waxay ka shaqeyneysey dalka Soomaaliya tan iyo 1977-dii markaasoo ay ka jawaabaysay qalalaasihii ka dhashay dagaalkii u dhexeeyay Itoobiya iyo Soomaaliya. Tan iyo 1982-dii, waxay joogtaysay joogitaankeeda Soomaaliya. Ergadu waxay ku sugan tahay magaalada Nayroobi tan iyo 1994.

Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed waa hayadda ugu muhiimsan oo ay wada shaqeeyaan ICRC-da Soomaaliya. Bisha Cas ee Soomaaliyeed oo isticmaalaysa shabakad xafiisyo oo ay ku leedahay dalka oo dhan, ayaa waxay bixisaa adeegga aasaasiga ah ee bulshada. Si wadajir ah, ICRC iyo Bisha Cas waxay ka shaqeeyaan horumarinta howlaha daryeelka caafimaadka, daweynta dadka ku dhaawacma hubka, gargaar deg deg ah ee loogu talagalay dadka nugul iyo inay dib u soo celiyaan xiriirka xubnaha qoyska oo ay kala geeyeen colaadaha.

## DARYEEL CAAFIMAAD

Si loo xaqiijiyo in dadka ku dhaawacma hubka marka ay socdaan isku dhacyada hubeysan ay helayaan daryeel caafimaad oo haboon, ICRC-da waxay taageertaa labada isbitaal qaliinka ee Madiina iyo Keysenay ee Muqdisho. Caawinaad deg deg oo aan joogto ahayn ayaa la siiyaa Bisha Cas iyo xarumaha kale caafimaadka ee Soomaaliya haddii ay dhacaan khasaarooyin xoogan. Inka badan, 6000 oo qof oo ku dhaawacmay hub ayaa waxay ka helaan dawo ICRC-da sanad kasta.

*Intaas waxaa dheer, In CRC-du taageerto isla markaana siiso qalab iyo tababar 30 xarumo caafimaad oo ay Bisha Cas kuleedahay bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya. Xarumahan waxay xaqiijiyaan in dadka ay helayaan daryeelka caafimaadka aasaasiga ah iyo dawo tayo leh. In ka badan 725,000 qofood ayaa waxay isticmaalan adeegyadan sanad kasta.*

Iyadoo ka jawaabaysa abaarta iyo cudurro soo noqnoqda, ICRC-da waxay taageertaa kooxo guurguura oo caafimaadka ah oo wax ka qabanaya baahida aasaasiga ah ee caafimaadka kuna xiriirinaya caruurta nafaqodaradu hayso iyo hooyooyinkooda xarumaha ugu dhow ee daryeelka. ICRC-da waxay kaloo tageero siisaa mutadawaciinta Bisha Cas ee horumarinaya howlaha nadaafada wanaagsan si ay ugu hortagaan faafitaanka cuduradda biyaha ka dhasha.

## NOLOLEEDKA

ICRC-da Soomaaliya waxay dib u soo celinaysaa ama horumarineysa hab-nololeedka iyo awooda dhaqaale ee bulshada, kuwaasoo ay wiiqeen toboneeyo sano oo colaad ah iyo masiibooyin dabiici ah iyadoo fulinaysa mashaariic beeraha, kalluumeysiga, biyaha iyo daqli abuuris ah. In ka badan hal milyan qofood ayaa sanad walba ka faa'ideysta mashaariicdan loogu tala galay in lagu kobciyo isku filnaashaha bulshada. Tan iyo 2012-kii, ICRC-da waxay caawisaa xoolo dhaqatada si ay wax uga qabtaan caafimaadka xoolahooda.

ICRC-da waxay diyaar u tahay inay ka jawaab bixiso baahida nafaqo ee deg deg ah ee dadka nugul ee Soomaaliya iyadoo qeybinaysa raashin marka loo baahdo (In ka badan 2,800,000 oo qof ayaa helay cunto sanadadii 2011-ka iyo 2012-ka).

Intaas waxaa dheer, ICRC-da waxay gargaar biyo dhaamis deg deg ah gaarsiisaa dadka ay barakiciyaan colaadaha ayna saameeyeen roob yarida. Kumaanan kun oo dad ah iyo xoolahooda ayaa ka faa'idaysto biyo nadiif ah iyagoo ka helaya ceelal riigeedyo la hagaajiyay, ceelal gacmeedyo, biyo qabatino la dayactiray ee ku yaala Koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya iyo qeybo ka mid ah Puntland.

ICRC In Somalia - Som.indd 1 10/16/12 5:43 PM



## XEERKA CAALAMIGA EE AADAMINIMO

ICRC-da waxay wadahal la gashaa dhamaan kooxaha kala duwan ee colaadaha si ay ugu wada hadlayaan arrimaha gargaarka iyo sharuucda quseeya habdhaqanka colaadaha. Waxay dhiiri gelisaa xurmada xeerka caalamiga ee aadaminimo (IHL) iyadoo xusuusinaysa kooxaha oo dhan inay xaqiijiyaan badbaadada kuwa aan ka qeyb qaadanaynin colaadaha sida dadka dhaawaca ah, lahaystayaasha iyo rayidka. waxay kaloo faafisaa aqoonta qiyamka aadaminimo,iyadoo u mareysa barnaamijyo raadiyaha ah oo tixraacaya caadooiyinka dagaalka ee Soomaalida, kuwaasoo aqoonsan baahida ah in laga badbaadiyo haweenka, caruurta, dhaawaca iyo bukaanka weerarada.  ICRC-da waxay booqanaysaa laheystayaal oo ay ku bilowday Muqdisho si ay u kormeerto macaamilka iyo xaaladaha xabsiyada gaar ahaan shaqsiyaadka u xiran arrimo la xiriira colaadaha.

*ICRC-da waxay kaloo dib isugu soo celisaa ayna xiriir u samaysaa* xubnaha qoyska ee ay kala geeyeen colaadaha. Iyadoo la shaqaynaysa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed. ICRC-da waxay ururisaa fariimaha aqbaarta qoyska ayna u qaybisaa qaraabada kala maqan ee qoyska ee jooga gudaha iyo dibada Soomaaliya. Waxay kaloo taageertaa barnaamijka baafinta ee ee BBC-da ee afka Soomaaliga iyo boggeeda internet-ka

ICRC

ICRC Somalia Delegation
Denis Pritt Road
P. O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi - Kenya
www.icrc.org
© ICRC, September 2012

2012.0189/402 10/2012




# ICRC
# DA SOOMAALIYA

ICRC
Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas

All photos: ICRC

IN BRIEF

ICRC In Somalia - Som.indd 2
10/16/12 5:43 PM